

# Caawimaad dhab ah.

Oo hadadan  
la helayo.



## \$100 Gunnada Keydka Korontada (Power Saving Bonus): Barnaamijka Wacyigelinta Bulshada

Taageerada taleefoonka ama qaab shaqsi ahaaneed loo siinayo dadka haysta kaadhka qiimo-dhimista (concession card) si ay u codsadaan \$100 ee Gunnada Beeqaaminta Korontada waxa laga heli karaa Barnaamijkeena Wacyigelinta Bulshada (Community Outreach Program).

### \$100-ka ah Gunnada Keydka Korontada

Gunnada Beekhaaminta Korontada waa deeq lacag-bixin oo gaareysa \$100 taas oo ka caawinaysa dadka helaya inay xal u helaan qiiimaha nolosha isla mar ahaantaasna hoos u dhigi doonta biilasha tamarta ee ay helayaan dadka reer Victoria ee baahida u qaba. Qoysaska reer Victoria ee haysta kaarka qiimo-dhimista ee xaqa u leh waxay booqan karaan website ka Isbarbardhiga Tamarta Victoria - [compare.energy.vic.gov.au](https://compare.energy.vic.gov.au) – halkaas oo ay arjigooda ku soo gudbin karaan qaab online ah ama waxay arjigooda ku soo gudbin karaan Barnaamijka Wacyigelinta Bulshada.

### Barnaamijka Wacyigelinta Bulshada

Dadka haysta kaadhka qiimo-dhimista ee u baahan in laga caawiyoo codsashada lacag bixintaas \$100 waxay caawimadaas ku heli karaan qaab taleefanka ah ama ayagoo qaab shaqsi oo toos ah uga helaya Barnaamijka Wacyigelinta Bulshada.

Qoysaska u qalma lacag-bixinta waxay wici karaan 1800 000 832 si ay u codsadaan \$100 ee Gunnada Beeqaaminta Korontada ah so ay u sameeyaan codsasho taleefanka ah ama waxaa lagu xiri doonaa hay'ada wacyigelinta bulshada ee ka howlagasha deegaankooda.

### Shuruudaha u-qalmida

Si aad u noqoto qof u qalma, qoysasku waxay u baahan doonaan:

- Inay heystaan biil koronto guri oo la degan yahay oo dhowaanahan ah
- Inay leeyihii mid ka mid ah kaararka qiimo-dhimista (concession cards) ee soo socda:
  - Kaadhka Daryeelka Caafimaadka
  - Kaarka qiimo-dhimista (Pensioner Concession Card) ee loogu talagalay dadka hawlgabka
  - Kaarka Qiimo-dhimista ee Arrimaha Ciidamada Howlgabka noqday
  - Kaarka Dahabka ee Arrimaha Ciidanka.

Qoyskiiba hal mar ayay lacagtaas heli karaan.



Si aad u dalbato lacag-bixinta \$100 ee Gunnada Beeqaaminta Korontada ah, booqo [compare.energy.vic.gov.au](https://compare.energy.vic.gov.au) ama ku codso qaab taleefoon ama adigoo si toos ah ugu tagaya Barnaamijka Wacyigelinta Bulshada.



# Caawimaad dhab ah. Oo hadadan la helayo.

## Qaabka ay u shaqeyso

- Xaqiji inaad u qalantid \$100-ka ah Gunnada Keydinta Korontada.
- Dyaarso dokumentiyada soo socda:
  - nuqul ah bil koronto oo mardhow laguu soo diray
  - kaar qiimo-dhimis oo ah mid u qalma
  - shatiga dareewalnimada ama kaarka Medicare\*
- Waxaad u baahan doontaa inaad keento macluumaadka dokumentiyadan si loo xaqiliyo qofka aad tahay iyo inaad u qalanto.
- La xiriir ururada ku taxan boggan si aad arji ugu gudbiso qaab taleefan ama adoo goobta xaadiraya.
- Haddii codsigaaga la aqbalo, waxaanu kuu soo diri doonaa \$100.

## Kaararka qiimo-dhimista ee u qalma



\*Immicard iyo Fiisaha Australia oo sidoo kale la aqbalo

## Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo sidii aad u codsan lahayd lacag-bixintaas \$100?

### Taageero taleefan

Khadka Caawinta ee Isbarbardhiga Tamarta Victoria - 1800 000 832

Khadka Caawinta ee Isbarbar-dhigista Tamarta Victoria wuxuu ganacsiyada Victoria iyo qoysaska ka caawiyya sidii ay u isticmaali lahaayeen shabakadda Isbarbardhingga tamarta Victoria si ay meeshaas uga helaan dalabka tamarta ee ugu fiican ee ay iyagu heli karaan. Khadka caawinta waxa kale oo uu bixiyaa macluumaad iyo talo ku saabsan \$100 ee Gunnada Beeqaaminta Korantada taas oo ay ku jirto caawimada tooska ah ee loo heli karo qoysaska u qalma inay telefoonka ku codsadaan.

### Taageerada sida tooska ah qofka loo siiyo (In-person support)

Guryaha Xaafada Victoria (Neighbourhood Houses Victoria) – hel xarun ka qeybgaleysa howlahan oo ka ag dhow deegaankaaga adigoo wacaya 1800 000 832 ama booqanaya [compare.energy.vic.gov.au/psb-outreach](http://compare.energy.vic.gov.au/psb-outreach)

Neighbourhood Houses waa ururo bulsho oo ka howlgala deegaankaaga shaqaalaheeduna yahay dad iskood u shaqeeya oo u daacad ah shaqadooda waxayna bixiyaan taageero kala duwan oo dhinaca bulshada ah, waxbarasho iyo mid bulshadeed oo kala duwan, oo loogu talagalay dadka da'a kasta jira, awood kasta leh isla markaasna qowmiyad kasta kasoo jeeda.

## Ma kugu adagtahay inaad bixiso biilasha korontadaada?

Barnaamijka Kaalmada Tamarta (The Energy Assistance Program) waa adeeg telefoon oo lacag la'aan ah oo uu qofku helayo iyadoo lala kaashanayo Anglicare Victoria deeqdaas oo kaa caawimaysa in kharash aad ku beeqaamiso biilasha korontada. Barnaamijka waxaa heli kara qoysaska dakhligoodu hooseeyo ama qoysaska ay ku adag tahay inay biilasha korontada iska bixiyaan.

Barnaamiju wuxuu dadka u qalma siin karaa caawimaad shaqsi si ay:

- u dalbadaan qiimo-dhimista iyo deeqaha ay u qalmaan
- u helaan banaamijka ay shirkadooda korontada ugu talagashay dadka ay ku adag tahay inay biilasha iska bixiyaan
- u helaan, isuguna barbardhigaan haddii loo baahdana ugu wareegaan dalab koronto oo ka fiican kan ay hada ku-jiraan
- u fahamaan biilasha korontada una sheegaan wixii khaladaad ah ee jiri kara
- u beekhaamiyaan korontada guriga
- u helaan adeegyada sida kala-talinta dhaqaalaha.



Si aad caawimaad ugu hesho biilasha tamarta, wac 1800 161 215 Isniinta ilaa Jimcaha 9:00-ka subaxnimo ilaa 5-ta galbnimo (marka laga reebo maalmaha ciidaha ah).

© Waaxda Tamarta ee Gobolka Victoria, Deegaanka iyo Ficilka Cimilada Ougosto 2025

ISBN 978-1-76176-512-4 (Print)  
ISBN 978-1-76176-513-1 (pdf/online/MS word)

### Afeef

Daabacaadann ayaa laga yaabaa inay ku caawiso laakiin Gobolka Victoria iyo shaqaalaheedu ma damaanad qaadayaan in daabacaadann ay tahay mid aan cillad lahayn nooc kasta oo ay ahaataba ama ay ku habboon tahay ujeeddooyinkaaga gaarka ah, sidaas darteed ma qaadan doono wixii masuuliyad ah, ama khasaare ah ama cawaqaib kale oo ka iman kara haddii aad ku tiirsanaato macluumaad kasta oo ku qoran daabacadan.



Wixii caawimaad ku saabsan luuqadaha aan Ingiriiska ahayn, kala xidhiidh Adeegyada Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Services - TIS) 131 450.

